

WASHINGTON BREATHES
washingtonbreathes.org

# Canshuureynta Ganacsiga Tubaakada: Saamaynta ay ku leedahay Isticmaalka iyo Sinnaanta

## Kor u kaca qiimaha badeecooyinka tubaakadu waxay yareeysaa isticmaalka iyo bilaabista isticmaalka ee dhallinyarada, waxayna kordhisaa joojinta isticmaalka tubaakada




**Dhallinyarada iyo dadka da'yarta waaweyn ayuu si gaar ah u saameeyaa qiimaha badeecada.**

Cilmi-baaris tobannaan sano socotay ayaa muujisay in canshuuruhu yihiin aalad muhiim ah oo lagu yareeyo isticmaalka badeecooyinka nikotiinta iyo tubaakada ee waxyeellada leh, isla markaana qabatinka keena.

**Soo-saareyaasha iyo tafaariiqleydu waxay inta badan qayb ahaan uga hortagaan kororka canshuurta iyagoo adeegsanaya kuubanno, qiimo-dhimisyo iyo xayeysiisyo, taas oo hoos u dhigta qiimaha ugu dambeeya ee uu macaamilku bixiyo.**

### Canshuureynta isku heer ah ee lagu soo rogo dhammaan badeecooyinka tubaakada iyo nikotiinta waxay yareysaa isticmaalkooda

- waxay si wax ku ool ah uga hortagtaa isticmaalka nooc kasta oo badeeco nikotiin ama tubaako ah ee dhallinyarada
- waxay dadka ku dhiirrigelisaa inay gebi ahaanba joojiyaan isticmaalka, halkii ay u wareegi lahaayeen badeeco ka jaban

**Washington taariikh ahaan ma aysan lahayn isku heer ama isu-dhigmaansho canshuureed oo u dhexeeya heerarka canshuuraha tubaakada iyo nikotiinta.**
Ilaa 2026, Washington waxay canshuurtay badeecooyinka uumiga (vapor) iyadoo oo ay adeegsanayso mugga, halkii ay ka adeegsan lahayd heer canshuureed la mid ah kan badeecooyinka kale ee nikotiinta iyo tubaakada. Laga bilaabo Janaayo 2026, badeecooyinka uumiga iyo badeecooyinka kale ee nikotiinta ayaa lagu canshuuraa boqolleyda 95% qiimaha iibka, balse heerarka canshuurta sigaarku way ka duwan yihiin.

### Canshuuraha badeecooyinka gaarka ah ayaa si caddaalad leh loo qaybiyaa marka qayb weyn oo ka mid ah dakhliga canshuuraha loo qoondeeyo ka hortagga isticmaalka tubaakada ganacsiga iyo taageeridda dadka doonaya inay joojiyaan isticmaalkooda

Washington waxay sannadkii 2025 ka heshay canshuuraha tubaakada ku dhowaad ~$284 milyan oo doollar ah. Hadda, dakhligaan waxaa lagu shubaa Sanduuqa Guud ee Dowladda, mana jiro qayb si gaar ah loogu qoondeeyo ka hortagga isticmaalka tubaakada ganacsiga, ka caawinta dadka inay joojiyaan isticmaalkeeda, ama daaweynta cudurrada la xiriira tubaakada.

> *"**Faa'iidada ka dhalanaysa kordhinta qiimaha sigaarka ayaa sii weynaan lahayd haddii dakhliga dheeraadka ah ee canshuurta loo qoondeyn lahaa barnaamijyada xakamaynta tubaakada iyo barnaamijyada kale ee caafimaadka ee loogu talagalay dadka dakhligoodu hooseeyo iyo kooxaha bulshada**, ee xaaladdooda dhaqaale liidato, gaar ahaan barnaamijyada joogtada ah ee dadka ka caawiya joojinta sigaarka, si loo gaarsiiyo dadka laga yaabo inaysan joojin sigaarka sababtoo ah qiimaha oo kordhay, ama dadka halista ugu jira inay dib u bilaabaan sigaarka."*
> *Warbixinta 2024 ee Dhakhtarka Qaliinka Guud ee Maraykanka (U.S. Surgeon General)*

**Washington Breathes** waa isbahaysi heer gobol ah oo ay ku mideysan yihiin ururro iyo shakhsiyaadyo oo ka shaqeenaysa sidii loo ciribtiri lahaa waxyeellada ka dhalata isticmaalka ka ganacsiga tubaakada.

**washingtonbreathes.org Ilaha xogteena waxay ku jiraan internetka bogga bit.ly/WaTobaccoTaxSources**

# Canshuuraha Tubaakada ee Hadda ka Jira Washington iyo Taariikhdooda

Heerarka canshuuraha sigaarka iyo badeecooyinka kale ee tubaakada ayaa markii ugu dambeysay ay koradhay sannadkii 2010. (Heerka 12-aad ee ugu sarreeya Maraykanka ee loogu talagalay canshuurta sigaarka, laga bilaabo Janaayo 2026).

- Dakhliga waxaa lagu shubaa Sanduuqa Guud ee Dowladda.
- Laga soo bilaabo 1993 ilaa 2009, qayb ka mid ah dakhliga waxaa loo qoondeyn jiray daryeelka caafimaadka.

Canshuurta badeecooyinka uumiga ah waxaa la hirgeliyay sannadkii 2019, iyadoo dakhligeeda loo qaybiyay si siman 50/50 Sanduuqa Andy Hill CARE Fund iyo Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha ee Aasaasiga ah (Foundational Public Health Services).

Laga bilaabo 2026, badeecooyinka uumiga waxaa lagu canshuuray heerka canshuurta ee badeecooyinka kale ee tubaakada, dakhliga ka soo baxana waxaa lagu shubi doonaa Sanduuqa Guud ee Dowladda.

| | Heerka Canshuurta ee Hadda ka Jira Washington | Heerarka Canshuuraha ee ku Jira Gobollada Deriska ah (2025) |
|---|---|---|
| **Canshuurta Sigaarka Xeerka Dib Loo Muraajiceyay Ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 82.24** | 15.125 senti halkii xabbo oo sigaar ah<br>= $3.025 baakidh-kiiba | OR: $3.33 baakidh-kiiba<br>CA: $2.87 baakidh-kiiba<br>ID: $0.57 baakidh-kiiba |
| **Canshuurta Badeecooyinka Uumiga RCW 82.25.010** | Marka ay ahayd Janaayo 2026, waxaa lagu canshuuray boqolleyda 95% qiimaha badeecadda.<br>---<br>Laga soo bilaabo 2019 ilaa 2026, inta badan sigaarrada uumiga ah waxaa lagu canshuuri jiray 27 senti/millilitir (mL). 9 senti/millilitir (mL) ee dareeraha sigaarka uumiga ah ee ku jira weelasha furan ee ka badan 5 mL. | OR: 65% qiimaha jumlada<br>CA: 54.27% qiimaha jumlada + 12.5% qiimaha tafaariiqda ah<br>ID: midna |
| **Sigaarrada Waaweyn iyo Sigaarrada Yaryar RCW 82.26.020** | 95% qiimaha sigaarka, iyadoo aan la dhaafin 65 senti sigaarkiiba.<br>Sigaarrada yaryar waxaa loo canshuuraa sida sigaarrada caadiga ah. | OR: 65% qiimaha jumlada<br>CA: 54.27% qiimaha jumlada; sigaarrada yaryar waxaa lagu canshuuraa si la mid ah sigaarka caadiga ah<br>ID: 40% qiimaha jumlada |
| **Tubaakada qoyan ee sanka laga qaato RCW 82.26.020** | gasac 1.2 qurjac ama wax ka yar: $2.526 ama labaatan jeer 83.5% ee canshuurta sigaarka, midba midka uu ka sareeyo | OR: $1.86 halka wiqiyad<br>CA: 54.27% qiimaha jumlada<br>ID: 40% qiimaha jumlada |
| **Badeecooyinka Kale ee Tubaakada RCW 82.26.020** | 95% ee qiimaha badeecadda;<br>heerar canshuureed oo ka hooseeya badeecooyinka khatartooda la dhimay | OR: 65% qiimaha jumlada<br>CA: 54.27% qiimaha jumlada<br>ID: 40% qiimaha jumlada |

**Canshuuraha Federaalka:** Sigaarada waxay helaan $1.01 dheeraad ah baakadhka. Sigaarrada waaweyn waxaa lagu canshuuraa 52.75% qiimaha iibka ee soo-saaraha, oo leh canshuurta ugu badan ay tahay 40.26¢/sigaar. Tubaakada pipe-ka lagu cabo iyo tubaakada gacanta lagu duubo waxaa lagu canshuuraa, siday u kala horreeyaan, $2.83 iyo $24.78 halkii rodol.

## HESHIISYADA CANSHUURTA EE QAAILKA AH

Qabiilooyinka ku nool Washington waa dalal madax-bannaan oo xiriir dowlad-ilaa-dowlad ah la leh Gobolka Washington.

- 27 ka mid ah 29-ka qabiillada ee dowladda federaalku aqoonsan tahay ayaa heshiisyo qaailka ah la leh Gobolka Washington si ay u ururiyaan canshuuraha sigaarka ee loogu talagalay iibsiga xubin aan qabiilka ka tirsanayn ee ku sugan dhulka qabiilka. Qabiiladu waxay xubnahooda ka dhaafi karaan canshuurta.
- Canshuuraha sigaarka qabiilka ee aan xubin ahayn waa in ay 100% ka mid noqdaan canshuurta WA iyo canshuuraha iibka gobolka iyo maxalliga ah muddo 3 sano gudahood ah. Inta lagu jiro muddada hirgelinta tartiib-tartiibka ah, canshuurta qabiilku waa inay ugu yaraan noqotaa 80% canshuurta gobolka. Heshiiska qaailka ah Qaranka Yakama wuxuu leeyahay muddo hirgelin tartiib-tartiib ah oo ka dheer.
- Qabiilooyinka qaarkood waxay sidoo kale canshuuraan badeecooyinka uumiga ah, waxayna heshiisyo qaailka ah la leeyihiin gobolka.
- Heshiisyada qaailka ah Qabiilka Puyallup ee canshuuraha sigaarka iyo badeecooyinka uumiga ah waxay dhigayaan in 30% dakhliga lala wadaago gobolka.

Xaashidan xogta saxda ah waxaa diyaariyey Kooxda Shaqada Siyaasadda ee isbahaysiga, waxaana ansixiyey Guddiga Hoggaanka.

**washingtonbreathes.org Ilaha xogteena waxay ku jiraan internetka bogga bit.ly/WaTobaccoTaxSources**